



Janaayo 7, 2022

Qalabka Daryeelka Dhibaataada ee Ku-meelgaarka ah ee Oregon

Mabaadi'da

Haddii ay dhibaato ku timaado caafimaadka dadweynaha, baahida daryeelka caafimaadka ayaa ka badan karo awooda daryeel nolol badbaadin lagu siin karo dhammaan cida u baahan. Maadaama la filayo in Omicron uu sii faafi doona taasi oo culeys dheeri ah saari doonta awooda isbitaalka, OHA ayaa bixineysa qalabkan daryeelka dhibaataada ee ku-meelgaarka ah ee isbitaaladu ay isticmaali karaan si ay si siman u kala hormariyaan daryeelka marka la eego sariiraha daryeelka degdega ah ee xadidan, mashiinada hawada iyo agabyada kale ee nafta lagu badbaadiyo haddii loo baahdo.

OHA ayaa soo saartay qalabkan daryeelka dhibaataada ee ku-meelgaarka ah iyada lagu saleynayo dhawr qalab oo horey ujira oo quseeya kala soocida heerka daawaynta, sida kuwa ay daabaceen Arizona, Massachusetts iyo Washington, waxayna samaysay laqabsi waafaqsan [Mabaadi'da Oregon ee Horumarinta Sinnaanta Caafimaadka ee ku aadan Dhacdooyinka ay Khayraadadu Xadidan yihiin](#).¹ Mabiidi'dan waxaa kamid ah takoor la'aan, sinaan caafimaad, go'aan qaadasho ay bukaannadu garwadeen ka yihiin iyo wada-xiriir daahfuran.

Isbitaalada Oregon ayaa hawlgalin kara miqyaasyada daryeelka dhibaatooyinka haddii agabyadooda daryeelka degdega ah ay aad u xaddidan yihiin, tirada bukaannada raadsanayo daryeelka degdega ah ay ka badan yihiin awoodda isbitaalka, iyo haddii uusan jirin ikhtiyaar ah in bukaanada lagu wareejiyo xarumaha kale ee daryeelka degdega ah.

Isbitaalada leh qalabka daryeelka dhibaataada ee ku saabsan khayraadada xadidan ee daryeelka degdega ah waxay sii wadi karaan adeegsiga qalabka ay haystaan haddii uu la janqaadayo mabaadi'da lagu qeexay [Mabaadi'da Oregon ee Horumarinta Sinnaanta Caafimaadka ee ku aadan Dhacdooyinka ay Khayraadadu Xadidan yihiin](#) oo uusan ku xadgudbeyn sharciyada ka hortagga takoorka ee gobolka ama federaalka, ama sharci kastoo kale oo lagu dabaqi karo.

Faafida Omicron ma saamaxayso wakhti ku filan iskaashi dhammaystiran oo si buuxda uga wada qaybqaataan bulshada iyo dhakhaatiirta kaasi loo baahan yahay si loo sameeyo qalab ku aadan kala soocida heerka daawaynta ee loogu talagalay isbitaalada Oregon. OHA waxaa weli ka go'an inaan si degdeg ah u sii wadno shaqadeena barbar socodka ah ee aan ku abuureyno qalabyo cusub oo loogu talagalay qoondaynta khayraadada xadidan ee iskaashatada bulshadayada iyo bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ee Oregon, waxaana jiilaalkan isugu yeehi doonaa Guddiga cusub ee La-talinta ee Qoondaynta Khayraadka Oregon. Guddigaan ayaa go'aamin doona dib u-eegista lagu sameynayo mabaadi'da la daabacay 2020 ee OHA iyo qalabkan daryeelka dhibaataada ee ku-meelgaarka ah wuxuuna hagi doonaa dejinta wixii kaloo agabyo dheeraad ah

¹ <https://sharingsystems.dhsoha.state.or.us/DHSForms/Served/II3513.pdf>

ee lagama maarmaan ah ee gacan ka geysanayo in udub dhexaad looga dhigo sinnaanta caafimaadka hannaanada iyo go'aannada markii agabyada nidaamka daryeelka caafimaad ay xaddidan yihiin.

Qalabkan ku-meelgaarka ah ayaa weli ah mid aan dhammaystirneyn oo aan ku filneyn wax ka qabashada sinnaan la'aanta caafimaadka, xitaa maadaama uu si fiican u tixgelinayo takoor la'aanta Oregon, mabaadi'da sinnaanta caafimaadka markay timaado go'aamada adag ee kala soocida heerka daawaynta.

Carqaladaha nidaamka caafimaadka ee wajahayo bulshooyinka midabka leh, bulshooyinka qabaa'ilka iyo dadka naafada ah, iyo la kulanka aan loo sineyn ee cudurada raaga, ayaa la xiriira sinnaan la'aanta halista ah ee ku aadan helida daryeelka caafimaad ee loo baahan yahay, helida guri ammaan iyo taageero leh, cunto ku filan iyo nafaqo, iyo inbadan. Shaqada ka horeysa Guddiga La-talinta ee Qoondaynta Khayraadka ee Oregon waa in ay si gaar ah diirada u saarto sidii aan u wanaajin lahayn inaan si loo siman yahay u qoondayno khayraadka xadidan, innagoo aqoonsanayna sinnaan la'aanta aasaasiga ah ee bilaabma ka hor habka kala soocida heerka daawaynta iyo kala-horeynta waqtiga dhibaatada.

Fikradaha: Heerarka kala duwan ee daryeelka

Sida uu qeexay Machadka Daawada sandkii 2013², baahida loo qabo awoodda sare ee daryeelka caafimaadka xiliyada dhibaatada waxay ka dhacdaa heerar kala duwan iyadoo ku salaysan baahida loo qabo adeegyada daryeelka caafimaadka iyo agabyada la heli karo. Fikradahaan waxaa ka mid ah:

- **Awoodda caadiga ah.** Goobaha, shaqaalaha, iyo saadka loo isticmaalo bixinta daryeelka waxay la janqaadayaan dhaqamada maalinlaha ah ee kajira isbitaalada. Goobaha daryeelka caafimaadka iyo hab-dhaqannada loo isticmaalo wax ka qabashada cudurka faafayo ayaa ku filan inay taageeraan daryeel caafimaad oo u dhigma daryeelka bukaan ee caadiga ah.
- **Awoodda xaaladaha lama filaanka ah.** Goobaha, shaqaalaha, iyo saadka la isticmaalayo ma aha kuwo waafaqsan dhaqamada maalinlaha ah, balse waxay taageeraan daryeel waxqabad ahaan u dhigma dhaqamada daryeelka bukaan ee caadiga ah. Wax-kabeddelka isticmaalka goobaha daryeelka caafimaadka ama dhaqamada ayaa loo isticmaali karaa si ku-meelgaar ah ama si joogto ah inta uu jira cudurka faafayo (marka baahida dhacdada ka badan tahay khayraadyada bulshada).
- **Awoodda xiliga dhibaatada.** Hawlgalinta awooda xiliga dhibaatada waxay ka dhigan tahay isbedel weyn oo lagu sameeyo miqyaasyada daryeelka. Xaalad dhibaato ayaa jirta marka agabyada daryeelka degdega ah ay aad u xaddidan yihiin, tirada bukaannada raadsanayo daryeelka degdega ah ay ka badan yihiin awoodda isbitaalka, iyo marka uusan jirin ikhtiyaar ah in loo wareejiyo xarumaha kale ee daryeelka degdega ah.

² Machadka Daawada 2013. *Miqyaasyada Daryeelka ee Dhibaatada: Qalab loogu talagalay Tilmaamayaasha iyo Kiciyeyaasha*. Washington, DC: Safaaxada Akademiyada Qaran. <https://doi.org/10.17226/18338>.

Male-awaalyada

Haddii ay khayraad yari timaado, OHA waxay la shaqayn doontaa isbitaallada Oregon si ay u sameeyaan dadaal kasta oo lagu kordhinayo awoodda dhammaan nidaamka daryeelka caafimaadka si daryeelka loo baahan yahay loo siiyo bukaanada suurtagal ahaan ugu badan. Tani waxaa lagu gaari doonaa dadaalo isku-duwid si bukaanada si siman loogu qaybiyo xarumaha iyo in khayraadyada degdega ah lagu hago aaggaga ay saameynta ugu weyn soo gaartay. Isku-duwida iskaashatada jawaabta ee dhammaan heerarka (heerka xarun, deegaan, gobol, iyo heerka federaal) ayaa la filayaa si loo daboolo baahiyada caafimaad ee sii kordhaya.

Isbitaalada Oregon ayaa hawlgalin kara miqyaasyada daryeelka dhibaatooyinka haddii agabyadooda daryeelka degdega ah ay aad u xaddidan yihiin, tirada bukaannada raadsanayo daryeelka degdega ah ay ka badan yihiin awoodda isbitaalka, iyo haddii uusan jirin ikhtiyaar ah in bukaanada lagu wareejiyo xarumaha kale ee daryeelka degdega ah.

Kahor hirgelinta talooyinka kala soocida heerka daaqaynta ee lagu daray dukumiintigan, male-awaalyada soo socda ayaa la buuxin doonaa:

- Isbitaal kasta wuxuu qaadi doonaa dhammaan tillaabooyinka suurtagalka ah si uu u kordhiyo awoodda uu ku bixinayo khayraadyada daryeelka degdega ah, oo ay ku jiraan (a) ururinta saadka; (b) dib u dhigista daryeelka aan degdega ahayn; (c) isu diyaarinta isticmaalka goobaha, shaqaalaha iyo khayraadyada kale ee aan caadiyan loo isticmaalin bixinta daryeelka degdega ah si loo bixiyo daryeelka degdega ah.
- Isbitaal kasta wuxuu isku-duwid la yeelan doonaa OHA, isbitaalada khayraadka gobolka iyo iskaashatada kale ee deegaanka iyo gobolka ee jwaab-bixinta wuxuuna ku baraarujin doonaa xaaladda taagan.
- Miqyaasyada daryeelka dhibaataada (CSC) ayaa kaliya la hawlgaliyaa markay jiraan xaalado aan caadi ahayn kuwaasi oo agabyada daryeelka degdega ah ay aad u xaddidan yihiin, tirada bukaannada raadsanayo daryeelka degdega ah ay ka badan yihiin awoodda isbitaalka, iyo marka uusan jirin ikhtiyaar ah in loo wareejiyo xarumaha kale ee daryeelka degdega ah.

Marka isbitaalku buuxiyo dhammaan male-awaalyada kor ku xusan ee ku saabsan baahida loo qabo CSC lana dhammaystiro dhammaan xulashooyinka kale, isbitaallada waa inay hawlgaliyaan qalabka daryeelka dhibaataada si ay u kala soocaan heerarka khayraadyada daryeelka degdega ah. Isbitaaladu waa inay OHA u sheegaan in CSC la hawlgaliyay oo ay si cad u soo dhejiyaan in qalabyada dhibaataada la isticmaalayo waana inay qalabka ay isticmaalayaan ka dhigaan mid la heli karo markii la codsado.

Dadweynuhu waxay u baahan doonaan inay helaan xogta ugu cusub, sax ah, oo daah-furnaan oo ku saabsan isticmaalka CSC, iyo inay helaan tilmaamo kasta oo haboon oo ku saabsan sida ay u raadsan karaan helida daryeelka inta lagu gudajiro musiibada.

Baahida isticmaalka joogtada ah ee qalabka daryeelka dhibaataada waa in si joogto ah loo qiimeeyaa, kala-soocida heerka daawayntana waa in isla markiiba la hakiyaa hadiiba khayraadyada degdega ahi aysan dambe xadidneyn.

Hagida daryeelka dhibaataada: Hordhaca

Haddii khayraadyadu ku filan yihiin, dhammaan bukaannada ka faa'iidaynta kara daawaynta ayaa la siin doonaa daawayn. Haddii khayraadyadu aysan ku filnayn, dhammaan bukaannada ayaa si gaar ah loo qiimayn doonaa iyadoo lagu saleynayo caddaynta caafimaad ee ugu wanaagsan ee la heli karo.

- Go'aamada daryeelka waa in lagu saleeyo suurtagalnimada badbaadada qofka iyo isbitaal ka-saarida.
- Qofna looma diidi doono daryeel iyadoo lagu salaynayo fikrado khaldan ama male-awaal ku saabsan tayada nololeed ee shakhsiga, ama xukun ku saabsan "qiimaha" shakhsiga iyadoo lagu saleynayo joogitaanka ama maqnaanshaha naafada.

Isticmaalka hore ama mustaqbalka ah ee shaqsi ee ku aadan khayraadyada caafimaad ama kuwa bulsheed ma noqon kara arrin saameyn ku yeelan karta go'aamada daryeelka. Wax-kabedelyo macquul ah waa in ku haboon yihiin lagu dabaqaa shuruudaha kala soocida heerka daawaynta si loo tixgeliyo shaqsiyaadka naafada ah. Wax-kabedelyada kale ee macquulka ah ee loo baahan yahay si loo hubiyo in si dadka kale la siman loo daweyo bukaanada naafada ah ayaa sidoo kale loo baahan karaa.

Dhammaan bukaannada, iyadoon la eegayn khayraadka la heli karo, waxaa loola dhaqmi doonaa si leh ixtiraam, daryeel, iyo naxariis. Go'aamada kala soocida heerka daawaynta ayaa la gaari doonaa iyadoo aan la eegayn tixgalinada damiir ahaan ama cilmi ahaan aan khusayn sida heerka bulsho ama dhaqaale, jinsiyada, qowmiyada, aqoonsiga jinsi, nooca jinsi, asalka qaran, heerka socdaal, caqiidada, heerka waalid, awooda lacag bixin, caymiska caafimaad, naafanimada, heerka ruug-cadaaga, macluumaadka hidda-wadaha, tayada nolosha ee la dareensan yahay, xooga/muddada khayraadka, qiimaha bulsheed ee la dareensan yahay, ama iyadoo gebi ahaanba ku saleysan da'da.

Go'aamada kala soocida heerka daawaynta waa inaysan isticmaalin shuruudo ka saarid oo gaar ah oo ku saleysan mid ka mid ah arrimaha kor ku taxan. Balse, go'aamada waa in la gaaraa iyada oo la adeegsanayo qiimeyn shakhsi oo ku salaysan caddaynta caafimaad ee ugu fiican. Iyada oo qayb ka ah qiimayn kasta, wax-kabeddeliyada macquulka ah, caawimaadka iyo adeegyada dheeriga ah, iyo adeegyada tarjumaada luqadda waa in la bixiyaa markii loo baahdo si loo xaqiijiyo helitaanka daryeelka caafimaad.

Haddii wakhtigu saamaxayo, isbitaalada gaaray heerka xaalad lama filaan ah ama xaalad dhibaato oo wajahayo khayraad/agab yari (sariiraha isbitaal, sariiraha ICU, mashiinada hawada, mishiinada sifaynta kelyaha, iwm) waa inay la shaqeeyaan xarumaha kale si ay u eegaan in khayraadyadan laga heli karo meelo kale. Haddii wakhtigu uusan saamaxayn iyo/ama xarumaha kale ay ku yar yihiin khayraadyada degdega ah, borotokoolada kala soocida heerka daawaynta sida kuwa lagu qeexay dukumiintigan waa in la isticmaalo.

Doorbidyada daryeel ee bukaanka

Kahor, iyo sidoo kale inta lagu gudajiro hirgelinta CSC, dadaal kasta waa in la sameeyaa si loo go'aamiyo hadafyada daryeel ee bukaanka iyo doorbidyada daaweyn. Waa lama huraan in la ogaado in faragelin xoogan ah sida isbitaal dhigista, gelinta ICU ama mashiinka hawo-qaadashada ay waafaqsan yihiin doorbidyada bukaanka iyo in kale.

Bukaanada leh awooda go'aan-qaadasho, diidmada xog-ogaalka ah iyo rabitaanka xog-ogaalka ah ee ee shakhsiga ee ku aadan daawaynta nolol-raajinta waa in la ixtiraamaa ilaa intii suurtagal ah marka la eego go'aamada kala soocida heerka daawaynta ee ay tahay in la gaaro. Bukaanada iyo qoysaskooda waa inaan lagu hagin ama lagu cadaadin inay oggolaadaan ka-noqoshada, joojinta, ama u doodista daryeelka nolol-raajinta. Dhammaan bukaannada isbitaalka la dhigay waa in la waydiiyaa inay leeyihiin darbaaranno horudhac ah oo ku saabsan dukumiintiyada daryeelka caafimaadka, amarada la qaadi karo ee daawaynta nolol-raajinta (POLST)³, waxa ay yihiin hadafyadooda daryeelka, waana in si adag loogu dhiirigeliyaa inay magacaabaan go'aan gaare wakiil ka ah (tusaale, wakiilka daryeelka caafimaad ama awoodda qareen ee joogtada ah ee daryeelka caafimaad) haddii aysan hore u lahayn.

Go'aan qaadasho la taageeray ayaa loo isticmaali doonaa bukaanada ay xadidan tahay ama ay hooseyso awoodooda au ku gaarayaan go'aano ku saabsan caafimaadkooda. Tani waxay bukaanada naafada ah u ogolaanaysaa inay aqoonsadaan dad taageero oo qofka naafada ah ka caawiyo inuu fahmo, tixgeliyo, oo uu sheego go'aannada, taasi oo bukaanka naafada ah siineyso qalab uu ku gaaro go'aano xog ku salaysan.⁴

Bixiyeyaasha waa in ay ka taxadaraan in aysan ku cadaadin bukaanada ama qoysaskooda inay yeeshaan go'aamada qorshaynta daryeelka oo hordhac ah iyagoo ku saleynayo aragtida tayada nolol ama qiimaha barbardhiga ah waana inaysan uga baahan bukaanada in ay oggolaadaan go'aan ku aadan qorshaynta daryeelka oo hordhac ah si ay u sii wataan helitaanka adeegyada xarunta. Haddii dukumiintiyada qorshaynta daryeelka ee hordhaca ah ay jiraan oo la heli karo, daryeel caafimaad bixiyaha waa in uu xaqiijiyaa in hadafyada daryeelka bukaanka iyo doorbididiyada daawaynta ay ahaanayaan sidii hore. Amarada caafimaad iyo dukumiintiyada qorsheynta daryeelka ee hordhaca ah waa in la cusboonaysiiyaa haddii rabitaanada daawaynta ee bukaanku ay isbeddeleen.

Kooxda kala soocida heerka daawaynta ee CSC

Kooxda kala soocida heerka daawaynta ee CSC waa in uu isbitaalku u qoondeeyaa fulinta go'aamada qoondaynta khayraadyada daryeelka degdega ah. Kuwa ah wakiilada kooxda kala soocida heerka daawaynta waa inaysan daryeelaynin bukaanka marayo kala soocida heerka daawaynta, in taasi aysan suurtagal noqon weydo mooyee marka la eego awooda shaqaale ee isbitaalka. Shaqaalaha kala soocida heerka daawaynta waa in ay ka baxaan go'aaminta kala soocida heerka daawaynta ee bukaanada ay iyaga daaweeynayaan in aan xulasho kale la haysan mooyee. Marka ay suurtagal tahay, waxaa lagu talinayaa in kooxda kala soocida heerka daawaynta ee CSC ee isbitaalka ay ka kooban tahay:

- Laba ilaa saddex dhakhtar oo khibrad u leh kala soocida heerka daawaynta (tusaale, daryeelka degdega ah, daawada gurmada ah, qalliinka dhaawacyada, iwm.). Kuwani waa inay ku jiraan ugu yaraan hal dhakhtar iyo hal kalkaaliye caafimaad. Dhakhaatiirtani waa in ay haystaan shati oo ay si firfircoon uga qaybqaadanayaan shaqadooda.
- Qof xirfad u leh anshaxa caafimaadka oo khibrad iyo tababar u leh kala latalinta anshaxa daryeelka caafimaadka.

³ <https://oregonpolst.org>

⁴ SB 1606/OAR 333-505-0033

- Khabiir ku takhasusay kala duwanaanshaha, sinnaanta iyo ka mid ahaanshaha.
- Kaaliye maamul oo qorayo dhammaan go'aamada kooxda kala soocida heerka daawaynta oona joojteynayo diiwaannada iyo dukumentiyada lagama maarmaanka ah.

Si loo yareeyo eexashada qarsoon, ilaa iyo inta ugu badan ee suurtoogalka ah waa in isbitaal kasta leeyahay koox ka kooban saraakiisha kala soocida heerka daawaynta iyo kooxda kala soocida heerka daawaynta kuwaas oo si waafi ah uga tarjumaya kala duwanaanshaha bukaanada ee uu isbitaalku u adeego marka la eego dhanka tirada dadka sida jinsiyada, qowmiyada, naafonimada, luqadda la doorbidayo, nooca jinsiga iyo aqoonsiga jinsiga. Waa in la isku dayaa in la isu keeno koox ka tarjumaysa kala duwanaanshaha bulshada iyo dadka uu isbitaalku u adeego. Kala duwanaanshaha saraakiisha kala soocida heerka daawaynta waxaa loogu talagalay in lagu hormariyo sinnaanta caafimaadka iyo in lagu yareeyo sii socoshada farqiyada caafimaad ee kajira qoondaynta khayraadka.

Xubnaha kooxda kala soocida heerka daawaynta ee isbitaalka ee mas'uulka ka ah go'aaminta qoondaynta khayraadka yar waa inay sidoo kale leeyihiin tababar ku saabsan eexashada qarsoon iyo ka-hortagga cunsuriyadda. Haddii shaqaale tababarkan leh aan isla markiiba la heli karin, tababarkan waa in la siiyo xubnaha kooxda kala soocida heerka daawaynta sida ugu dhakhsaha badan.

Habka kala soocida heerka daawaynta ee loogu talagalay qoondaynta khayraadka daryeelka degdega ah

Marka CSC la hirgeliyo, bixiyayaasha ayaa buundooyinka kala soocida heerka daawaynta u qoondayn doona dhammaan bukaanada u baahan heerka daryeelka ICU (tusaale, bukaanada qaba dhiig-karka, u baahan taageerada hawo-qaadashada, baahiyada kale ee heerka ICU). Nidaamyadan kala soocida heerka daawaynta waa in lagu dabaqaa dhammaan shakhsiyaadka, oo ay ku jiraan bukaanada qaba COVID-19 iyo bukaanada aan qabin COVID-19 labaduba, iyadoon loo eegayn da'da, heerka naafanimada, ama arrimo kale oo ka baxsan. Dhammaan shakhsiyaadka waa in lagu daraa laguna qiimeeyaa isla kala soocida heerka daawaynta ee shakhsiyaadka u baahan daawaynta daryeelka degdega ah.

- Qiimaynta waa in loo gaaryeela bukaan kasta iyadoo lagu salaynayo caddaynta caafimaad ee ugu fiican ee la heli karo, ku habboon, iyo ujeedada. Marka la tixgelinayo saadaasha cudurka, tixgelinta ku habboon waxay khusaysaa dhacdooyinka ba'an iyo dib u soo celinta asalka bukaanka waana in aan lagu darin tixgelinada badbaadada bukaanka ee muddada dheer ama xooga khayraadka/muddada baahida.
- Haddii ay jirta xaalad dhif ah oo shaxda tixraaca ee la bixiyay aysan muujineyn shay muhiim u ah go'aaminta saadaasha cudurka, bixiyayaasha waxay tixgelin karaan waxyaabo dheeraad ah marka ay jiraan xaalado ay kala soocida heerka daawaynta (buundooyinka) siman yihiin ama aan la awoodin in la go'aamiyo sababtoo ah la'aanta xog caafimaad.
- Kadib marka la soo bandhigo macluumaadka caafimaad ee la xidhiidha shuruudaha kala soocida heerka daawaynta oo kaliya, bixiyayaasha daawada ayaa la joojin doonaa oo sark-aalka (iisha) kala soocida heerka daawaynta ayaa gaadhi doona go'aan ku salaysan kala soocida heerka daawaynta oo ku saabsan qoondaynta agabyada yar; tusaale ahaan, bilaabista, sii wadida, ama la noqoshada khayraad gaar ah oo yar. Bixiyayaasha daawada ma gaadhi doonaan go'aano lagu joojinayo ama looga noqonayo faragelinada nolol-raajinta ee xaaladaha CSC hadiiba la heli karo sarkaalka kala soocida heerka daawaynta

oo madax-banaan ama la-taliyaha anshaxa ama in lagu ogolyahay Xeerka Dib loo Eegay ee Oregon (ORS) 127.635 mooyee.

- Bixiyeyaasha daawada ayaa laga yaabaa inay gaadhaan go'aamo ay ku joojinayaan ama kaga noqonayaan taageerada nololaha iyagoo ku salaynayo wada-hadallada hadafyada daryeelka iyada oo loo marayo go'aan-qaadasho lala wadaago bukaanka/qoyska. Tani waxay la janqaadaysaa dhaqanka caadiga ah.

Buundooyinka mudnaanta kala soocida heerka daawaynta

Buundooyinka mudnaanta kala soocida heerka daawaynta ayaa loo xisaabiyaa dadka qaangaarka ah iyadoo la adeegsanayo nidaamka dhibcaha ee ku saleysan dhibcaha SOFA ama mSOFA si loo qiimeeyo badbaadada qofka ilaa isbitaal ka-saarida ee ay muujineyso caddaynta caafimaad ee ugu fiican ee la heli karo. Wax-kabeddelo waa in loo sameeyaa shakhsiyaadka qaba cudurrada kelyaha ee raaga sida hoos ku qeexan.

Bukaanada carruurta ah, waa in la isticmaalo aalad saadaaliso cudurka oo da'da ku habboon (tusaale, PELOD-2 loogu talagalay carruurta, SNAPPE-II loogu talagalay dhallaanka waqti-buuxa ku dhashay, iyo NICHD-OT loogu talagalay dhallaanka dhiciska ah). Hoos ka eeg qaybta tixgelinada carruurta.

Wax-kabeddelo macquul ah waa in sidoo kale lagu sameeyo qalab kasta oo qiimeyn markii loo baahdo si loo xaqiijiyo in buundooyinka mudnaanta kala-soocida heerka daawaynta ee kama dambeysta ahi ay sax yihiin oo lagu isticmaali kara bukaanada naafada ah, iyo in sifooyinka la xiriira naafanimada ee aan la xiriirin halista muddada gaaban ee dhimashada aysan uga sii darin dhibcaha bukaanka. Isticmaalka dhibcaha gaarka u ah carruurta, sida PELOD-2, ayaa wax-kabeddel macquul ah u noqon kara bukaanada naafada ah (tusaale, dhego-la'aanta, xadidaada garashada ama dhaqdhaqaaqa).

Dhammaan bukaanada waxay xaq u yeelan doonaan inay helaan sariirada iyo adeegyada daryeelka degdega ah iyada oo aan la eegayn buundooyinka mudnaanta kala soocida heerka daawaynta, laakiin agabyada daryeelka degdega ah ee la heli karo waxaa la qoondayn doonaa iyadoo lagu saleynayo buundooyinka mudnaanta, sida marka helitaanka adeegyadan ay go'aamin doonta inta bukaan ee heli doona daryeelka degdega ah.

Tallaabooyinka lagu xisaabinayo buundooyinka mudnaanta kala soocida heerka daawaynta

Tallaabada 1-aad: Go'aami saadaasha badbaadada isbitaalka:

- a. Qiimee heerka hawlgabka xubnaha sida lagu cabbiray ama lagu sheegay SOFA, mSOFA (Shaxda A) ama qalabka saadaasha cudurka ee da'da ku habboon (tusaale, PELOD-2 loogu talagalay carruurta, SANAPE-II loogu talagalay dhallaanka waqti-buuxa ku dhashay, iyo NICHD-OT loogu talagalay dhallaanka dhiciska ah). Waxaad sidoo kale tixgeliin kartaa aaladaha kale ee la ansixiyey ee loogu talagalay duruufaha gaarka ah markay habboon yihiin, tusaale, MGAP loogu talagalay bukaanada taraamada.
- b. Wax-kabeddel dhibcaha mSOFA ama SOFA ee bukaanada qaba xanuunka kelyaha ee raaga (eeg hoos).
- c. Qiimee baahida loo qabo isbeddel macquul ah oo loogu talagalay shakhsiyaadka naafada ah (eeg hoos).

Tallaabada 2-aad: U qoondee buundooyinka mudnaanta kala soocida heerka daawaynta adigoo ku saleynayo saadaasha badbaadada isbitaalka:

- d. U adeegso buundooyinka kala soocida heerka daawaynta adigoo eegayo Jadwalka **B** iyo caddaynta caafimaad ee ugu fiican ee la heli karo.
- a. **JOOJI** oo dib u-eeg dhibcaha si loo helo iswaafaq caafimaad loona ogaado eexashada suurtagalka ah; dhiirigeli kaqaybgalka kooxda kala soocida heerka daawaynta inta lagu jiro dib u-eegistan.
- b. Haddii qaar ka mid ah macluumaadka caadiyan loo isticmaalo go'aaminta saadaasha badbaadada isbitaalka aan isla markiiba la heli karin, waxaa loo baahan doonaa xukun caafimaad iyo/ama wax-kabeddel macquul ah oo lagu sameeyo qalabka qiimaynta.
- c. Tixgeli calaamadaha caafimaad ee muujinaya in bukaanku dhiman doono
- d. Haddii buundooyinka mudnaanta kala soocidda heerka daawaynta ee ku salaysan qalabyada saadaasha sida mSOFA/SOFA aanay ahayn kuwa caafimaad ahaan iswaafaqsan, wax-kabeddel dhibcaha hadba sidii loogu baahdo, adiga oo tallo ka helaya kooxda kala soocida heerka daawaynta ee culuumta kala duwan, isla markaana maanka ku haya eexashada iman karta.

Tallaabada 3-aad: Xaqiiji oo soo sheeg buundooyinka mudnaanta kala soocida heerka daawaynta. Bukaana leh dhibcaha ugu hooseeya waxaa la siin doonaa mudnaanta ugu sareysa si ay u helaan khayraadyada daryeelka degdega ah

Tallaabada 4-aad: Haddii bukaan buuxiyo shuruudaha gelinta ICU laakiin uu helo mudnaanta hoose ee khayraadka daryeelka degdega ah, bukaanka waxaa la gelin doonaa liiska sugitaanka ee ICU waxaana la dhigi doonaa dabaqa daryeelka joogtada ah. Marka khayraadyada la helo, xaaladdooda caafimaad dib ayaa loo qiimeyn doonaa, waxaana lagu sameyn dib u kala soocida heerka daawayn iyadoo lagu salaynayo shuruudaha lagu qeexay Tallaabada 1-3.

Fiiri jaantuska 1-aad si aad u hesho sharaxaada tallaabooyinka CSC.

Shaxda A. Qalabka wax laga beddelay ee qiimaynta isku xigxiga ah ee hawlgabka xubnaha (mSOFA)

Nidaamka Xubnaha	0	1	2	3	4
Neefsashada SpO ₂ /FiO ₂	>400	≤400	≤315	≤235	≤150
Beerka	Ma jira cagaarshow			cagaarshow	
Wadnaha iyo xididada dhiiga, dhiig-kar	Ma jira dhiig-kar	MAP <70 mm Hg	dopamine ≤5 ama dobutamine ah garoojo kasta	dopamine >5 epinephrine ≤0.1 norepinephrine ≤0.1	dopamine >15 epinephrine >0.1 norepinephrine >0.1
Buundada Koomada ee CNS, Glasgow	15	13-14	10-12	6-9	<6

Nidaamka Xubnaha	0	1	2	3	4
Kelyaha, Creatinine mg /dL	<1.2	1.2-1.9	2.0-3.4	3.5-4.9	>5.0

Shaxda B. Saadaasha badbaadada isbitaalka iyadoo la isticmaalayo buundooyinka mSOFA

Buundooyinka				
1	2	3	4	5
mSOFA <6 ama >80% badbaadada la saadaaliyay	mSOFA 6-9 ama 60-80% badbaadada la saadaaliyay	mSOFA 10-12 ama 40-60% badbaadada la saadaaliyay	mSOFA >12 ama 20-40% badbaadada la saadaaliyay	dhimanayo ama <20% badbaadada la saadaaliyay

Bukaanada leh dhibcaha ugu hooseeya waxaa la siin doonaa mudnaanta ugu sareysa si ay u helaan khayraadyada daryeelka degdega ah

Wax-kabeddelyo lagu sameeynayo SOFA/mSOFA oo loogu talagalay bukaanada qaba cudurrada kelyaha ee raaga.

Isticmaalka dhibcaha SOFA/mSOFA waxay kordhin kartaa sinnaan la'aanta qaabdhismeedyada caafimaad ee haddeer jira.⁵ Tusaale ahaan, isticmaalka dhibcaha SOFA/mSOFA waxa ay saamayn taban oo aan laga sineyn ku yeelan doontaa bukaannada qaba cudurrada kelyaha ee raaga, kuwaas oo inta badan ah dad midabka leh, kuwaas oo si aan laga sineyn uu u saameeyay COVID-19. Iyadoo ah dadaal lagu yareynayo saameyntan, bukaan kasta oo la ogyahay inuu qabo cudur raaga oo ku dhaca kelyaha waxaa loo qoondeyn doonaa wax aan ka badneyn 2 dhibcood oo buundooyinka SOFA ama mSOFA haddii ay sareeyso kimikada creatinine ee kelyaha.

Qabatim macquul ah oo loogu talagalay isticmaalka SOFA/mSOFA ee bukaanada naafada ah.

Cabbirka Koomada ee Glasgow, oo ah qalab lagu cabbiro darnaanta dhaawaca maskaxda ee degdega ah ee SOFA/mSOFA, ayaa dhibco ku dara SOFA/mSOFA marka bukaanku aanu si cad u qeexi karin ereyo la fahmi karo, xitaa haddii xaaladdan ay ka dhalatay naafo hadal oo hore usii jirtay ama hawo-qaadasho xumo raagtay. Dadka naafada ah ee la kulma heerarka asaasiga ah ee naafanimada ka hor marxaladda daryeelka degdega ah waa in la siiyaa qabatim macquul ah markay timaado habka buundooyinka si aan loo kordhin dhibcaha SOFA/mSOFA ee ujeedooyinka borotokoolkan haddii aan la rumeysneyn in shuruudahaasi ay si toos ah oo weyn u saameeynayaan suurto galnimada ah in shakhsiga ka badbaado xanuunka daran markii la daaweeyo.

Intaa waxaa dheer, bukaanada qaba naafada wada-xiriirka iyo/ama kuwa aqoontooda Ingiriisiga ay xaddidan tahay waa in ay helitaan buuxa u yeeshaan adeegyada turjubaanka daryeelka

⁵ Schmidt H, Roberts DE, Eneanya ND. Xadidida, midab-takoorka iyo cadaalada: horumarinta doodda ku saabsan qoondaynta masihiinka hawada ee COVID-19 iyadoo aan midabka la dhowreynin [waxaa lagu daabacay onlayn kahor intaan la daabacin buuga, 6-da Janaayo]. J Med Ethics. 2021; medethics-2020-106856. doi:10.1136/medethics-2020-106856

caafimaad ee u qalma lana aqoonsan yahay, haddii la farana, tiknoolajiyada caawinta ama qabatimiyada kale ee macquulka ah si si habboon oo ujeedo leh loo dhammaystiro qiimaynta. Wixii ah bukaanada qaar ee qaba naafonimada wada-xiriirka oo weyn, isbitaalku waa inuu xaqiijiyaa in qofka (dadka) taageera ee la aqoonsaday ama xubnaha kale ee kooxda daryeelka bukaanka (tusaale xubin qoyska ka tirsan ama PCA-ga qaaska u ah) ay joogaan sariirta dhinaceeda iyagoo leh tababar badbaado oo habboon oona xiran PPE, sida uu dhigayo sharciga Oregon.

Qiimaynada la shakhsiyeeyay


Inkastoo hababka dhibcaha nololeed sida SOFA iyo mSOFA loogu talagalay in lagu saadaaliyo natiijooyinka kooxaha qaar, go'aan kasta oo dhibcaha kamid ah waa in lagu saleeyaa qiimeyn la shakhsiyeeyay oo ku saabsan nooca iyo heerka xanuunka daran ama dhaawaca oo ay ku jiraan taariikh si taxaddar leh loo sameeyay, baaritaan jireed, iyo isticmaalka daraasado kaabeyaal ah oo haboon iyo la-talin caafimaad oo aan ku jirin ka saarida tooska ah ee bukaannada qaba xaalado caafimaad ee raaga laakin aan gurmada ahayn.

Kahor inta aanan la sii wadin habkan kala soocida heerka daawaynta, waxaa muhiim ah in la ogaado inay jiraan dad qaar oo ay u badan tahay inay la kulmaan geeri degdeg ah ama mid dhaw xitaa haddii la siiyo daawaynta xoogan, sida in inta lagu jiro daryeelka caadiga ah ay dhakhaatiirta u siinin adeegyo daryeel oo degdeg ah (tusaale, dhiigbax weyn oo gudaha maskaxda ah oo uusan qalliin waxba u taraynin, shoog aan la daweyn karin xitaa haddii daawo la siiyo). Inta lagu jiro xaalada degdega ah ee caafimaadka dadwaynaha, dhakhaatiirta waa in ay wali isla go'aamadaa ka gaaraan haboonaanta caafimaad ee adeegyada daryeelka degdega ah iyaga oo isticmaalaya shuruudaha ay isticmaalaan inta lagu gudajiro daryeelka caadiga ah.

Qoraal ku saabsan bukaanada uu si joogto ah ugu xiran yahay mashiinka hawo-qaadashada

Marka bukaan uu si joogto ah ugu xiran yahay mashiinka hawo-qaadashada oo iyaga wata mashiinkooda (mid uusan isbitaalka lahayn) la dhigo isbitaalka, wuxuu bukaankaasi sii isticmaali doonaa mashiinkaasi kaasi oo loo arko inuu yahay hantidiisa gaarka ah. Marka bukaanadu ay ku xiran yihiin mashiinkooda hawo-qaadasho ee gaarka ah, bukaanadu waxaa laga dhaafayaa habka kala soocida heerka daawaynta marka mashiinada hawo-qaadashada ay yihiin khayraadka yar ee u baahan kala soocida. Marna mashiinka hawo-qaadasho oo gaar u ah bukaan laguma wareejin doona bukaan kale. Tani waxay sidoo kale ka siman tahay qalabyada kale ee caafimaad ee waara ee uu bukaanku isticmaalayo ee uusan lahayn isbitaalka.

Si kastaba ha ahaatee, haddii xaalada neefsasho ee bukaan si joogto ah ugu xiran yahay mashiinka hawo-qaadashada ay isbeddesho oo ay u baahan yihiin in lagu xiro mashiin hawo-qaadasho oo cusub oo uu isbitaalku leeyahay, bukaanka waxaa lagu dari doonaa qiimeynta iyo qoondaynta khayraadka haddii nidaamka CSC uu leeyahay kala soocid jirta oo ku aadan heerka daawaynta. Haddii ay tani dhacdo, mashiinka hawo-qaadashada ee gaarka u ah bukaankaa ayaa ahaanaya hanti gaar u ah isaga mana lagu dabaqi doono meelaynta aan ikhtiyaariga ahayn.



Habka xallinta ee mudnaanta loo siman yahay (kala bixiyaha)

Mar haddii bukaannada loo kala saaro iyadoo lagu saleynayo dhibcahooda kala soocida ee heerka daawaynta, xaalad ayaa weli iman karta halkaasi oo khayraadyo xaddidan ay u baahan yihiin laba bukaan ama in ka badan kuwaasi oo leh buundooyinka mudnaanta kala soocida heerka daawaynta oo isku mid ah.

Haddii mid ka mid ah bukaannada leh buundooyinka mudnaanta kala soocida heerka daawaynta ee siman uu horayba u helayo khayraadka, khayraadka waa in loo daayo bukaanka hadiiba bukaanku uusan caafimaad ahaan ka sii dareynin.

Xaaladaha kale ee ay jiraan mudnaan kama dambays ah oo siman oo ku aadan khayraad xadidan, qoondaynta waa in loo sameeyo qaab aan kala sooc lahayn iyada oo la isticmaalayo qalab sax ah oo quri tuur ah.

Fiiro gaar ah: OHA waxay ka warqabtaa in gobolada kale iyo qaar ka mid ah isbitaalada Oregon ay tixgeliyaan arrimo dheeraad ah inta lagu jiro kala soocida heerka daawaynta ama xaaladaha kala bixinta, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn heerka uurka iyo Tusaha Qiimeynta Bulsho-Dhaqaale ee Aagga bukaanka.⁶ OHA waxa ay dooratay in aanay si gaar ah ugu talin arrimahan ilaa looga sii wada hadli karo hab loo wada dhan yahay oo qayb ka ah wadatashiyada Guddiga La-talinta ee Qoondaynta Khayraadka Oregon.

Go'aannada daawaynta waa in aanay ku jirin tixgalinta badbaadada muddada dheer, go'aamada tayada nololaha, isticmaalka caafimaad ee la soo dhaafay ama mustaqbalka ah ama khayraadyada bulshada, xooga khayraadka, ama muddada baahida khayraadka.

Kala soocida socota ee heerka daawaynta

Dhibcaha mudnaanta kala soocida heerka daawaynta waa in dib loo xisaabiyaa waqtiyo joogto ah (tusaale, ugu yaraan 48-72 saacadoodba mar). Tani macnaheedu maaha in daryeelka bukaanku uu isbedeli doono; tani waa in loo ogolaado dhakhaatiirta daawaynta bixinayo iyo saraakiisha kala soocida heerka daawaynta inay ka warqabaan xaalada bukaan kasta iyo ka-warqabka Taliska Dhacdada ee isbitaalada ee ku saabsan khayraadyada deegaanka marka la eego baahida.

1. Haddii bukaan gaar ah oo helaya khayraadyo xadidan uu yeesho xaalad si weyn u saamaynaysa dhibcahooda kala soocida heerka daawaynta, waxaa laga yaabaa in dib loo go'aamiyo mudnaanta kala soocida heerka daawaynta ee bukaankaas qaaska ah.
2. Bukaan looma meelayn doono dhibcaha mudnaanta kala soocida heerka daawaynta oo hooseeyo sababtoo ah waxaa sii jireyso baahida ay u qabaan khayraad xadidan sida mashiinka hawo-qaadashada. Hadiiba caafimaadku uusan si wayn uga sii darin (tusaale, soo bixida dhibaato aad u xun) oo dhakhtarka bixinayo daawaynta uu dareemayo in isticmaalka joogtada ah ee khayraadka xadidan uu caafimaad ahaan muhiim yahay, khayraadka dib looma qoondayn doono. Dhakhtarka bixinayo daawaynta ma burin karo amarka sarkaalka kala soocida heerka daawaynta. Macluumaadka caafimaad ee soo baxaya ee ku saabsan caabuqyada COVID-19 ayaa muujinaya in bukaannada qaarkood ay u baahan yihiin in muddo dheer lagu xira mashiinka hawo-qaadashada; macluumaad cusub ayaa laga yaabaa inuu beddelo daawaynta ama dabiibinta haddeer jirta ee

⁶ <https://www.neighborhoodatlas.medicine.wisc.edu/>

caabuqan cusub oo aan dhammaystirnayn. Dukumiintigan loolama jeedo inuu farageliyo baahidaas ama xukunka caafimaad ee khuseeya daaweynta socota.

3. Waqtiyo joogto ah, kiisaska waa in si nidaamsan uu dib ugu eego sarkaalka kala soocida heerka daawaynta ama koox aan ahayn kuwa gaarayo go'aanka asalka ah si loo xaqiijiyo joogtaynta, cadaalada, iyo u hogaansanaanta nidaamka.

Codsiga dib u-qiimaynta kiisaska bukaanka

Dhakhtar kasta, ha go'aansado isaga uun ama ha noqoto codsiga bukaanka, qoyska ama u doodaha bukaanka, ayaa keeni kara codsi ah in bukaanka lagu sameeyo dib u-qiimayn loogu talagalay go'aaminta kala soocida heerka daawaynta ee CSC. Codsiyada waa in ay ku koobnaadaan walaacyada ku saabsan in buundada kala soocida heerka daawayn ee bukaanka ay sax tahay iyo in kale. Codsiga dib u-qiimaynta waa in lagu soo gudbiyaa qoraal ahaan.

Mid ama in ka badan oo ah saraakiisha kala soocida la magacaabay ee aan ku lug lahayn go'aankii asalka ahaa ama koox rafcaan oo gooni ah waa in loo qoondeeya si ay u eegaan kiiska. Iyadoo ku xiran xaaladda degdegga ah ee dhacdada caafimaadka (ie, mid aan ogeysiis lahayn ama mid dheeraatay) waxaa la fahamsan yahay in habkani uu noqon karo dib u-eegis. Si kastaba ha noqotee, haddii dhacdada ay aad u daba dheeraato oo laga yaaba in saameyn ay soo gaarta natiijooyinka suurtagalka ah ee bukaanku, markaa nidaamyo waa in la sameeyaa si loo oggolaado go'aan degdeg ah oo ku filan.

Go'aannada kama dambaysta ah ee codsi kasta oo ah dib u-qiimaynta kiiska bukaan qaas ah waa inay ahaadaan qoraal, taariikhaysan, oo waqti leh, waana inay ku jiraan dhammaan dukumiintiyada taageeraya.

Xog ururinta

Si dib-u-eegis loogu sameeyo suurtagalnimada ah in habka kala soocida heerka daawaynta uu uga sii dari karo sinnaan-la'aanta caafimaadka iyo si loo wargaliyo wixii macluumaad ah ee soo baxayo mustaqbalka, waa in isbitaalka uu xogtan soo socota u ururiyaa bukaan kasta oo marayo tixgelinta iyo kala soocida heerka daawayn ee qoondaynta khayraadka xadidan. Waxaa xusuus mudan, xogta dadka waa in aan lala wadaagin kooxda kala soocida heerka daawaynta si looga fogaado eexasho kasta oo suurtagal ah oo ku iman karta go'aan qaadashada qoondaynta khayraadka. Xogtani waa in si gaar ah loo ururiyaa iyada oo loo marayo habab maamuleed.

Xog ururinta ay tahay in lagu daro:

- Lambarka diiwaanka caafimaad ee bukaanka
- Magaca isbitaalka iyo goobta
- Taariikhda dhalashada
- Nooca jinsi iyo aqoonsiga jinsi ee bukaanka, haddii la yaqaan
- Jinsiyada, qowmiyada, luqadda iyo xogta naafada ee bukaanka (si waafaqsan shuruudaha REALD⁷)

⁷ <https://www.oregon.gov/oha/PH/DISEASES/CONDITIONS/COMMUNICABLEDISEASE/REPORTINGCOMMUNICABLEDISEASE/Pages/REAL-D-Collection-Toolkit.aspx>

- In wakhtiga la keenayay isbitaalka uu bukaanku isticmaalayey mashiinka hawo-qaadashada oo u gaar ah ama qalab ama khayraadyo kale oo loogu talagalay daawayn caafimaad iyo in kale.
- Cinwaanka guriga, inuusan guri lahayn ama aan la garanayn
- Doorbidyada daryeelka bukaanka, sida lagu diiwaangeliyay dardaaranka hordhaca ah, amarada la qaadi karo ee daawaynta nolol-raajinta (POLST), ama sida uu soo sheegay wakiilka daryeelka caafimaadka, qofka taageerada ah, ama xubin qoyska ka tirsan.
- Kala hormarinta kala soocida heerka daawaynta iyo natijada caafimaad

Isgaarsiin daahfuran

Isgaarsiinta daahfuran oo cad oo wax ku ool u ah dadweynaha iyo bukaanada marwalba waa muhiim laakin gaar ahaan sidaas inta lagu jiro masiimooyinka caafimaadka bulshada. Helitaanka warbixinta daryeelka caafimaadka loo baahanyahay waa nolol badbaadin dadkuna waa inaysan hoos ugu dhigin helitaanka waqtiyeysan iyo warbixinta caafimaadka la fahmi karo sababtoo ay tahay luuqadooda, dhaqanka, ama helitaanka cilmiga farsamada iyo taageerooyinka kale.

Daahfurnaanta waxay u baahantahay in dadweynaha la ogeysiiyo markii heerarka masiibooyin ee daryeelka la kiciyo. Dadweynaha waa inay hayaan warbixin cusub oo daahfuran ee ku saabsan qorshooyinka daryeelka dhibaataada ee nidaamka caafimaadka, oo ay ku jiraan sida Khayraadyada loogu qoondayn lahaa si ka duwan miqyaasyada daryeel ee caadiga ah, iyo goorta CSC la hawlgaliyay.

Gudaha nidaamka daryeelka caafimaadka, daahfurnaanta iyo xiriirka waqtiyeysan oo dhammaan bukaanada ama go'aan gaarhooda loo ansixiyay waa inuu dhacaa markii Khayraadka isbitaalka ay wajaheyso Khayraadka xadidan, oo ay ku jiraan nooca xadeynada iyo sida go'aamada qoondaynta Khayraadka loo sameynayo. Go'aan walba ee la xiriiro qoondaynta Khayraadka (tusaale ahaan, u qalmida neefsiiyaha ama qeybta daryeelka degdega heerka daryeelka) waa in si cad loogu sheegaa bukaanada ama go'aan gaarhooda iyo la qoro. Isbitaaladu waa inay dhammaan bukaanada siiyaan macluumaad ku saabsan sida loola xiriiri karo isuduwaha isbitaalka ee Sharciga Dadka Maraykanka ee Naafada ah (ADA) ama u doodaha bukaanka.

Dhammaan xiriirka inta lagu jiro xaalada degdega caafimaadka dadweynaha waa in lagu bixiyaa qaab dhaqan ahaan jawaab u ah oo luuqad ahaan loo heli karo oo buuxiso baahiyada shaqsiyaadka qabo curyaanimada caqliga, hormarka ama curyaanimada kale. Tani waxaa ku jiri karo, laakin tani kuma xadidno inay: siinta xiriir wax ku ool ah iyada oo la isticmaalayo turjubaano u qalma, iyada oo la sameynayo fariimeysiga degdega ee legu heli karo luuqad cad iyo luuqada la doorbiday, iyada oo la isticmaalayo qaabab badan sida maqalka, daabacaada balaaran, iyo qoraalka dhow, siinta helitaanka dad taageero ah ee uu doortay bukaanka ku caawin karo hubinta xiriir wax ku ool ah, iyo hubinta websaydyada bixinayo warbixin degdega ah waa curyaanimada loo geli karo sida looga baahanyahay sida waafaqsan sharciyada xaquuqaha rayidka faderaalka.

Tixgelinada carruurta

Kala hormarinta khayraadyada xadidan ee bukaanada carruurta ah waa hab la mid ah Kala hormarinta khayraadyada dadka waaweyn. Kooxda kala soocida heerka daawaynta waa inay kujiraan dhakhaatiir khibrad u leh daryeelka carruurta kuwaasi oo la janqaadayo anshaxa caafimaad.

Wax-kabeddel macquul ah oo lagu sameeyo PELOD-2 ama qalabyada daawaynta carruurta ee la midka ah ayaa noqon karta qabatim lagama maarmaan u ah bukaannada carruurta ah ee naafada ah. Bukaanka qaba naafanimada hadalka ee horey usii jirtay ama naafonimo saameeyneysa dhaqdhaqaaqa, tani waxay keeni kartaa dhibco sare oo ah PELOD-2 xitaa xaaladaha ay naafanimada bukaanku khusaynin halista muddada gaaban ee dhimashada. Markay jiraan xaaladahan oo kale, wax-kabeddel macquul ah oo lagu sameeyo PELOD-2 ama qalabyada caafimaad ee la midka ah ayaa ah in lagu sameeya qalabyadan si loo xaqiijiyo in sifooyinka la xidhiidha naafanimada ee aan la xidhiidhin halista muddada gaaban ee dhimashada aysan uga sii darin buundada bukaanka.

Habka kala soocida heerka daawaynta, kala soocida socota ee heerka daawaynta, dib u eegista iyo rafcaanku waxay la mid yihiin kuwa dadka waaweyn. Mar haddii uu bukaanku ku jiro ICU, waa in si joogto ah dib u-qiimayn loogu sameeyaa (sida dadka waaweyn) si loo daboolo baahida joogtada ah ee daryeelka ICU iyo/ama xaalad kasta oo soo baxda taasi oo si weyn u saamayn doonta dhibcaha mudnaanta kala soocida heerka daawaynta.

Haddii bukaannada carruurta ah u baahan yihiin khayraad lamid ah kuwa dadka waaweyn oo ay leeyihiin isla dhibcaha mudnaanta kala soocida heerka daawaynta oo lamid ah kuwa dadka waaweyn, qoondaynta waa in ay horey ugu socota qaab aan kala sooc lahayn iyada oo la isticmaalayo qalab sax ah oo quri tuur ah.

Magacyada la soo gaabiyay

COVID-19: Cudurka korona fayraska 2019

CSC: Miqyaasyada Daryeelka ee Dhibaatada

ICU: Qolka daryeelka degdega ah

MGAP: Nidaamka, Cabbirka Koomada ee Glasgow, iyo dhibcaha kala soocida da'da iyo heerka cadaadiska halbowlaha si loo saadaaliyo dhimashada bukaanada qaba taraamada.

mSOFA: Qalabka Wax Laga Beddelay ee Qiimaynta Isku Xigxiga ah ee Hawlgabka Xubnaha (mSOFA)

NICHD-OT: Qalabka Natijoooyinka ee Machadka Qaran ee Caafimaadka iyo Koriinka Carruurta ee loogu talagalay dhicisyada dhasho xili aad uga horeeyo xiliga dhalimada

OHA: Maamulka Caafimaadka Oregon

PCA Kaaliyaha daryeelka bukaanka

PELOD-2: Xubinta Carruurta ee Cilladaysan, raaca 2-aad

POLST: Amarka dhakhtarka ee daawaynta nolol-raajinta ah

PPE: Qalabka ilaalinta qofka

REALD: Xog ururinta Jinsiyada, Qowmiyada, Luuqada, Naafanimada

SNAPPE-II: Dhibcaha Dhallaanka Ku-dhashay Waqti-buuxa ee Cudurada Xubnaha Jirka iyo Kordhinta Xilliga Dhalmada kahor ee SNAP

SOFA: Qalabka Qiimaynta Isku Xigxiga ah ee Hawlgabka Xubnaha (SOFA)

Qirashooyinka

OHA waxay rabtaa in ay aqoonsato gobolada hagitaanadooda CSC iyo qalabyadooda kala soocida heerka daawayn ay caawiyeen wargelinta habka OHA. Link-yada hagitaanada iyo qalabyada ayaa ah kuwan hoose:

Arizona: <https://www.azdhs.gov/covid19/documents/healthcare-providers-sdmac/covid-19-addendum.pdf>

Massachusetts: <https://www.centerforpublicrep.org/wp-content/uploads/crisis-standards-of-care-guidance-10-20-2020.pdf>.

Washington: <https://www.doh.wa.gov/Portals/1/Documents/Pubs/821-151-CSC-TT-guidebook.PDF>.

Helitaanka dukumiintiga: Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. La xiriiir Qeybta Isgaarsiinta COVID-19 ee 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us